

Safar markay tahay hawshu waa "Is ilaali oo adkeyso"

Hadda dawladu waxay tiri safar wadanka gudahiisa ah iyo waddama kale oo dhowr ah waa la geli karaa. Laakiin ka taxadar shuruucda khusaysa safarka. Oo naftaada iyo tan dadka kaleba ilaali.

Laga bilaabo 13-juun waan ku dhex safri karnaa Iswiidhan. Laakiin fidida cudurkan weli ma dhamaan waana muhiim inaan sii wadno taxaderkeenii.

"Is ilaali oo adkeyso" ayey hay'adda caafimaadku leedahay. Oo laga wado sii wad mas'uuliyadaadii is ilaalinta, inayna sii adkeyso.

Wey fududahay in la iloobo in weli cudurkii jiro marka dibadda la joogo ee la qoraxaysanayo. Xaaladda sidii caadiga ahayd bay u egtahay. Laakiin cudurkan fasax ma qaadan.

Gobolka kalmar xaaladdu way daganayd bilowgii bishan juun. Hadase cusbitaalada dad badan baa yimid. Xagaaga sidey noqon doonto lama oga. Markaa waa in aad qaadataa mas'uuliyadaada.

"Adigaa lagaa rabaa inaad dadka ka fogaato" sidan waxaa yiri Maamulaha hay'adda u diyaargarowga xaaladah adag ee gobolada Ana Norlén. "Hadii qof kuu soo dhawaado u sheeg inuu kaa durko"

Sharciga cudurada fida ee Iswiidhan wuxuu leeyahay waa mas'uuliyad qof walba saaran joojinta cudurada fida.

Raac gaadiidka daweynaha hadaad ku qasbanthay oo keliya. Hadii kale soco ama baaskiil kaxayso.

Hadii aad ku safrayso gaadiidka dadweynaha, dooro tareen ama bas aad kursi heleyso. Raac nadaamkana intaad safarka ku jirto!

Haka qaybgelin kulamada dadka badan. Dib u dhigo kulamada sida, aroosyada, duugidda, IWM-ahba.

Mardhaw sharci baa kasoo bixi doona, goobaha lagu dabaasho ama kaambin loo tago.

Safarada dibadda wadanka ah.

Wasaaradda arrimaha dibaddu waxay kugula talinaysaa in aadan u safrin meel ka baxsan wadamada EU-da ilaa laga gaarayo 31-ka agoosto. Markay saas wasaaradda tiraahdu, waxaad u baahantahay caymis dheeraad ah hadday qasab noqoto in aad dhoofto.

Laga bilaabo 30-ka juun wadamada qaar ee EU-da waa loo safri karaa. Laakiin warkaas si dhaqso ah buu isu bedeli karaa. Beyjka EU-da baad macluumaad af-iswiidhish ku qoran ka aqrisan kartaa.

Sharciga is ilaalintu wey ku kala duwanyihiin wadamada.

"Håll i och håll ut"! (Is ilaali oo adkeyso)